

# Double switch operation

Qalliinka isweydaarinta qulqulka dhiigga




Ogeysiis:





The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404




© 2018 The Children's Heart Clinic

**Qalliinka Isweydaarinta Qulqulka Dhiigga**
**(Isweydaarinta Halbowleyaasha + Qeybta Wadnaha Kore)**
Double Switch Operation (Arterial + Atrial Switch)

Qalliinka isweydaarinta qulqulka dhiigga waxaa lagu saxayaa isdabamarid lagu dhasho oo ah halbowleyaasha waaweyn (ama L-TGA). Marka lagu dhasho halbowleyaal is weydaarsan, labada qalbac ee hoose (qalbacyada dhiigga) iyo xididdada waaweyn (halbowlaha dhiigga & sambabada) ayaa is daba marsan (oo soo kala horjeedsanaya). Markaas ka dib, qulqulka dhiigga weli caadi ayuu ahaanayaa. Dhiigga aan ogsajiinta lahayn wuxuu galayaa sambabada si ay ogsajiin u soo raacdo, oo dhiigga ogsajiinta leh wuxuu sii galayaa jirka kale. Hase ahaatee, waa qaab uu right ventricle (qalbaca midige ama RV) dhiigga ugu shubayo jirka, intii uu dhiiggu ka imaan lahaa left ventricle (qalbaca bidixe ama LV). Muddo ka dib, shaqada ah shubista dhiigga ee jirka waxay cadaadis saareysaa qalbaca midige ee RV, taas oo keeneysa in wadnuhu shaqeyn waayo. Qalliinka isweydaarinta qulqulka dhiigga waxaa loogu talagalay in caadi lagu soo celiyo qaabka uu qalbaca midige ee RV u shubayo dhiigga aan ogsijiinta lahayn ee sambabada iyo qalbaca bidixe ee LV si uu dhiigga ogsajiinta leh jirka ugu sii shubo.

Wakhtiga la sameynayo qalliinka isweydaarinta qulqulka dhiigga waxa ay ku xiran tahay qaabdhismeedka jirka ilmaha. Caadi ahaan, qalliinku waa mid lagu kala beddelayo waxa uu ku bilaaban karaa ilmaha oo yar, in kasta oo xaaladaha qaarkood aan la sameyn ilaa goor dambe oo ah carruurnimada. Tusaalaha qalliinka goorta hore waa xirista dhiigga pulmonary artery (halbowlaha sambabada ama PA) oo waa in sameeyo ka hor qalliinka isweydaarinta qulqulka dhiigga. Ujeedka xirista PA waa in dib loo tababaro qaabdhismeedka LV si ay ugu adkaysato shaqada kordheysa ee loo baahan yahay ee ah marka dhiiggu u sii gudbayo jirka.

Isweydaarinta waxaa loo sameeyaa si dib loogu leexiyo qulqulka dhiigga halbowleyaasha (isweydaarinta halbowleyaasha) iyo qeybta kore (isweydaarinta qeybta kore). Wakhtiga qalliinka isweydaarinta qulqulka dhiigga, duleelinta xabadka dhexe (jeexid bartamaha xabadka) ayaa la sameynayaa. Waxaa ilmaha lagu xiri doonaa wadne iyo sambab macmal ah (mashiin ah wadne-sambab). Qeybta isweydaarinta halbowlaha ee qalliinka, habowlaha wadnaha iyo PA labadaba waa la kala qeybinayaa. Haddii lagu taliyo, farsamada qalliinka weyn ee ilmaha ayaa la sameyn karaa, oo PA waxaa la keenayaa dhanka hore ee halbowlaha. Halbowlaha wadnaha ayaa markaa lagu tolayaa salka hore ee PA (oo hadda ah "halbowle-wadneed cusub"). Halbowleyaasha xawlmariidka midig iyo bidix ayaa laga saarayaa salkii hore ee halbowlaha wadnaha. Halbowleyaasha xawlmariidka ayaa markaas lagu tolayaa kuwa cusub ee ah salka "halbowle-wadneed cusub". Xuubka wadnaha agagaarkiisa ee ilmaha (kiishka ku wareegsan wadnaha) ayaa lagu hagaajinaa qeybtii hoore ee halbowlihii wadnaha ee hore (hadda waa in qeybta hoose tahay "sambab cusub") marka laga saaro halbowlaha xawlmariidka. PAs markaas waxaa lagu xirayaa xididka "sambabka cusub", oo wuxuu buuxinaya qeybtii beddelka halbowlaha ee qalliinka.

Qeybta beddelka halbowlaha ee qalliinka, Qalliin Buuxa, ama "Qalliin-barkiis" ayaa la sameynayaa. Qalliinkan intuu socdo, qalbaca midigta sare (qeybta kore) ee wadnaha ayaa la furayaa. Darbiga qeybta sare (meesha u dhaxeysa qeybaha sare ee midig iyo bidix ee wadnaha) waa la saarayaa. Qeyb ka mid ah xubaha, inta badan lo' (sac) xuubkiis ayaa loo isticmaalaa in lagu xiro qulqulka dhiigga ee ka soo baxa dhuunta soocelinta dhiigga ee hoose iyo kan sare (xididdada buluugga ah ku soo celiya wadnaha) iyada oo loo marayo muruqa saddexda gees, si ay uga sii aadi karaan qaabka RV morphologic iyo ka-bixista sambabada. Qalliin-barkiis markuu socdo qalliinka labada dhinac ee qulqulka dhiigga (eeg BDG) ayaa sidoo kale la sameeyaa, si markaas oo keliya dhiigga dhuunta soocelinta hoose ugu baahato qaab-qulquleedka dhiigga ee daboolka saddexda gees. Marka qaabqulquleedka dhiigga la sameeyo, dhiigga aan lahayn ogsijiinta wuxuu u qulquli doonaa RV oo dhiigga ogsijiinta leh ayaa u qulquli doonaa LV. Qallinka ayaa markaas ka dib shaqada qalbaca hoose badankeeda ku celinaya LV, taas oo ahayd naqshadda ujeedkeeda.

**Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:**

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka: 6 saac
- Qalabka Tuubooyinka: Waxaa ilmaha badankooda lagu soo celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (mid ah faleebbe daawada ama IV daawada laga qaato iyo in dhiig laga qaado), faleebbe ama IV bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecanka looga daadinayo, kateetaraha Foley oo ah kan kaadidu geleyso, iyo xargaha batariga wadnaha oo meelgaar ah.


© 2018 The Children's Heart Clinic

**Qalliinka Isweydaarinta Qulqulka Dhiigga**
**(Isweydaarinta Halbowleyaasha + Qeybta Wadnaha Kore)**
Double Switch Operation (Arterial + Atrial Switch)

- Sookabashada Caadiga ah Qalliinka Ka-Dib: Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saarayaa maalinta qalliinka ee koowaad ama labaad ee ku xigta. Tuubada halbowlaha badanaa waxaa laga saarayaa maalmo ka dib, marka laga joojiyo faleebbaha. Tuubada xididdada bartamaha waxaa laga bixinayaa marka laga joojiyo ee aan loo baahneyn in mar dambe a isticmaalo. Tuubooyinka xabadka waxaa laga saaraa 24 ilaa 48 saac ka dib qalliinka, markuu yaraado dheecaanka soo baxaya. Waxay ku xiran tahay qorshaha qalliinka, oo ilmaha waxaa loo qorayaa aspirin wakhti muddo ah qalliinka ka dib.
- Muddada Seexinta Isbitaalka: Wuxuu ilmuhu isbitaalka joogayaa badanaa 10 ilaa 14 maalmood ka dib qalliinka isweydaarinta qulqulka dhiigga.

**Qaadashada Daawooyinka Guriga:** Carruurtu waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib qalliinka isweydaarinta qulqulka dhiigga sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Daawada dhiigga jilcisa (Aspirin) looga hortago xinjirowga
- Dhimista culeyska iyo wadnaha looga fududeynayo hawsha iyo si loo yareeyo dhiigkarka (Enalapril, Captopril)


© 2018 The Children’s Heart Clinic